

Furasadaha Iskaa ku shaqeynta ee City of Yarra

Waxaa jira shaqooyin kala duwan oo iskaa ku shaqeyn ah Magaalada Yarra. shaxdan soo socota waxay taxeysaa qaar ka mid ah iyo noocyada ururada aad wax ugu qaban karto xirfadahaaga iskaa ku shaqeeye ahaan.

Adeegyada	Nooca Ururadan
Fanka(Arts)	<ul style="list-style-type: none"> Jilida kooxaha fanka Fanka/kooxaha farshaxanka Kooxaha muusiga Tilmaamaha muusiga Goobaha fanka
Ganacsiga(Business) (Macluumaadka Tignoolajiyada/information Technology, Xisaabaadka/Accounting, waxsoorka/Human Resources, Suuqgeynta/Marketing, isgaarsiinta/Telecommunications)	<ul style="list-style-type: none"> Tasiilaadka xafiiska sare ee ururada aan faa'iido doonka ahayn. Xarumaha sharciga bulshada/xarumaha caafimaadka
Dhalinyarada/Carruurta (Children and Youth)	<ul style="list-style-type: none"> Xarumha dhalinyarada Nashaadka madadaalada iyo ciyaaraha Hoyga gargaarka degdega ah Tasiilaadka xannaanada carruurta bulshada La talinta iyo shaqo kala talinta Adeegyada iyo kooxaha taageerada
Dadka linta leh (People with Disabilities)	<ul style="list-style-type: none"> Adeegyada iyo kooxyada taageerada Nashaadka madadaalada iyo cayaaraha Hoyga Hoosooyinka ku saleysan mihnada
Dhawrida dhulka iyo Degaanka (Environment and Conservation)	<ul style="list-style-type: none"> Barnaamijyo kala duwan oo laga helayo kooxaha dhawrida dhulka
Waxbarashada (Education)	<ul style="list-style-type: none"> Xarumaha bulshada Guryaha Neighbourhood Macalimiinta guriga
Dhaqamada kala duwan(Multicultural)	<ul style="list-style-type: none"> Barnaamijyo kala duwan ayaa laga helayaa kooxaha taageerada dhaqamada badan iyo xarumaha bulshada
Caafimaadka (Health)	<ul style="list-style-type: none"> Barnaamijyo kala duwan ayaa laga helayaa isbitaalada xaafada, guryaha daryeelka dadka waaweyn iyo xarumaha bulshada
(Xuquuqda bani'aadamka (Human Rights)	<ul style="list-style-type: none"> Ururada xuquuqda bani'aadamka Kooxaha taageerada iyo caawimaada dejinta qaxootiga
Madadaakada (Recreation)	<ul style="list-style-type: none"> Kooxaha hiwaayada Ururada dalxiiska Barnaamijyada cayaaraha bulshada Dhacdooyinka bulshada
Dadka Da'da ah (Seniors)	<ul style="list-style-type: none"> Guryaha daryeelka dadka waaweyn Booqashada saaxiibtinimo Adeegyada iyo kooxaha taageerada

	<ul style="list-style-type: none"> Nashaadka madadaalada iyo cayaaraha
Cayaaraha (Sports)	<ul style="list-style-type: none"> Naadiyada cayaaraha Barnaamijyada cayaaraha bulshada

Sidee baad iskaa ugu shaqeysaa?

Iskaa ku shaqeyn toos ah: Waxaad siin kartaa wakhtigaaga iyo xirfadahaaga inaad iskaa ugu shaqeyso urur aan faa'iido doon ahayn. Ururka aan faa'iido doonka ahayn wuxuu bixiyaa adeegyo bulshooyinka xaafada waxaana badanaa shaqaale u ah isku jir shaqaale mushaari ah iyo kuwo iskaa ku shaqeeya. Ururka aan faa'iido doonka ahayn uma qaybiyo faa'iidada saamilayaasha. Wixii faa'iido lacageed ah ee ka yimaada adeegyada uu bixiyo ururku waxaa dib loogu maalgeliyaa adeegyada cusub ama kuwa jira.

Iskaa ku shaqeynta aan tooska ahayn: Waa mid aan la qorsheyn oo badanaa ka dhex dhacda bulshada dhexdeeda markay dadku arkaan baahi oo ay diyaar u yihiin inay wax caawiyaan. Marmarka qaarkood, dadku waxay arkaan ama maqlaan waxqabad u muuqda madadaalo wayna iskaga biiraan. Tani waxay noqon kartaa oo ay isu bedeli kartaa wax ka go'an oo dadka dhexeysa. Iskaa ku shaqeynta aan tooska ahayn waxay u dhici kartaa siyaalo kala duwan oo ay ku jirto caawinta iskaa wax u qabsiga dugsiga xaafada ama masaajidka, caawinta saaxiib ama deris dayactirka guriga, adoo ka qaybgelaya kooxda ficilka ee deganayaasha, u soo qaadida waxyaalaha uu soo gato qof deriskaaga ahi oo jiran ama ka qaybqaadashada feestooyinka iyo dhacdooyinka bulshada xaafada.

Helida shaqo iskaa ah.

- Haddii aad kumbiyuutar aad isticmaasho heli kartid, fadlan jeegaree website-dada soo socda.*

www.govolunteer.com.au – wuxuu taxayaa boqolaal shaqo oo iskaa ah kana jira Magaalada Yarra iyo Melbourne oo dhan waxaad ka dalban kartaa interneetka. Shaqooyinka iskaaga ahi ee website kan waxaa soo xaheysiistay hay'adaha aan faa'iidada ku shaqeynin.

www.collingwood.grassroots.org.au iyo www.ourcommunity.com.au/yarragives iyo www.atherton.org.au – boggaga degaankan ee liisgareeye fursadaha iskaa ku shaqeynta iyo macluumaadka ku saabsan dhacdooyinka bulshada iyo nashaadka laga yaabo inaad ku lug yeelato. Shaqooyinka iskaa ku shaqeyntu ee website-dadan ku qoran waxaa soo xayeysiiyey ururada aan faa'iidada ku shaqeyn iyo kooxaha aan tooska ahayn ee bulshada.

- Baro bulshadaada xaafada.*

Waxaad ogaan kartaa wax ka badan fursadaha iskaa ku shaqeynta ee ka jira degaankaaga adoo la hadlaya dad aad taqaan, ka jeegareynaya buugga xaafadaada ee taleefanada xagga hoose ee cinwaanka 'ururada adeegyada bulshada' ama weydiinaya wax ku saabsan iskaa ku shaqeynta dukaamada fursada ee xaafada ama feestooyinka yo dhacdooyinka bulshada.

- *Ma u baahan tahay qof kula kulmo oo sidaa kuu caawiya?*

Xaruntaada Ilaaha Macluumaadka Iskaa ku shaqeeyayaasha ee Victoria 280 William Street Melbourne. Fadlan wac 9642 5266 si aad ballan uga sameysato Sarkaalka Macluumaadka. Waxay ku siin karaan caawimaad iyo taageero si aad u hesho shaqada iskaaga ah ee kugu wanaagsan. Waxaad ka heli kartaa wax badan www.volunteeringvictoria.org.au .

- *Ma hubtid miyaa waxaad sameyn lahayd?*

Fadlan kala xirriir Jason ama Michael Barnaamijka Taageerada Iskaa ku shaqeynta ee Caafimaadka Bulshada North Yarra 9411 4333.